

9ka May Dabaaldeg Maalinta Yurub ee Muqdisho – Heshiiska Cusub ee dib loogu dhisayo rajada Soomaaliya

09/05/2014

9ka May waxay ku beegantahay xuskii 64aad ee sanad guuradii baaqa Schuman, iyada oo uu horsed ka yahay Madaxweynaha Faderaalka Soomaaliya Xasan Sheekh Maxamuud, Midowga Yurub iyo saaxiibada Soomaaliya waxay wada jir Muqdisho ugu xuseen heshiis kooda.

Safiirka Midowga Yurub Michele Cervone d’Urso ayaa ku nuux nuuxsaday *“Waxkasta oo aan maanta Soomaaliya ka qabano wuxuu ka mid yahay heshiiska cusub (New Deal) waxaana rajaynaynaa inaan qodobo fiican ku turjumo rabitaanka dadka Soomaaliyeed. Waxaana leenahay dadka Soomaliyeed xidhiidh qoto dheer oo ka dhashay xidhiidh rasmi ah. Dadkeena iyo dhaqamadoodu way isku xidhan yihiin”*. Madaxweynaha Faderaalka Soomaaliya ayaa hoosta ka xariiqay inay tahayd fursad laga faa’idaysto iyo in la wadaago waayo aragnimo guud oo ku saabsan dib dhisida nabada iyo xasiloonaada, sidoo kale wuxuu u mahadnaqay Midowga Yurub sida ay xidhiidhka qotoda dheer ula leeyihiin Soomaaliya.

Safiirka Midowga Yurub wuxuu sidoo kale ku celiyay inay Midowga Yurub ka go’antahay inay sii xoojiyaan dadaalada Soomaaliya ee ay dib ugu dhisayso dhaqaneedii soo jireenka ahaa. *“Dhaqanku waa waxaynu nahay: waa baadi sooc, waa taariikhdeena, waa luuqadeena, waa qiimaheena, waa farshaxankeena, waa nuxurka umada. Soomaaliya waxay leedahay dhaqan qani ah oo gaar ah. Tani waa bilow cusub waxaynu furaynaa bog cusub oo xidhiidhka aan la leenahay Soomaaliya oo ku saabsan dhaqanka”*. Safiirka Midowga Yurub wuxuu ku wareejiyay Madaxweynaha Soomaaliya daraasad lagu baadhay dhaqanka oo ay diyaarisay UNESCO wuxuuna ku dhawaaqay dhismaha xarumo dhaqan.



EU MISSION TO SOMALIA

Delegation of the European Union to Kenya

P.O. Box 45119 Nairobi | Insurance House, Ragati Road, Upper Hill

Tel.: +254 (0)20 280 20 00

Email: SOMALIAMISSION@eeas.europa.eu

Website: <http://www.eu-somalia.eu>

Twitter: [@SomaliaEU](https://twitter.com/SomaliaEU) | Flickr: [EUSomalia](https://www.flickr.com/photos/eusomalia/) | Youtube: [EU SOMALIA](https://www.youtube.com/channel/UCk8Z8v8Z8v8Z8v8Z8v8Z8v8)